

# Orientation to Ontario

## XADGUDUBKA LOO GAYSTO WAAYEELKA

Dadka waayeelka ah waa in badanaa ay daryeel ka helaan xubnaha qoyska iyo daryeeleyaasha. Xadgudubka waayeelka ayaa dhaca marka qof wayn si khaldan uu ula dhaqmo ama uu dayaco qof ehelkiisa ah. Xubnaha qoyska ama dadka ka baxsan qoyska ayaa ku xadgudbi kara dadka waayeelka ah. Xadgudubka waayeelka ayaa noqon kara mid jireed, dareen, galmo ama dhaqaale waxaana sidoo kale ku jira dayacaada.

**Xadgudub jireed** waxaa ku jiri fal kasta oo keenaaya waxyeelo ama xanuun:

- dharbaaxo, nabar, riixid, ruxid, qabashada ama xanibida
- xanibaadaha jirka ee aan muhiimka ahayn
- u diidista daawada ama siinta qofka daawo aad uga badan intii la rabay
- u diidista cuntada ama inaan la siin cuntada saxda ah
- ku qasbida cunista cuntada ama daawada

**Xadgudubka dareenka ama dhimirka** waxaa ku jira noocyada badan ee habdhaqannada:

- Adeegsiga hanjabaadaha ama cabsida si loo cabsi geliyo qof
- u diidista qofka inuu la kulmo saaxiibadiis ama xubnaha qoyskiisa
- in qofka loo diido inuu go'aan ka gaaro ama loola dhaqmo sida inuu yahay ilmo oo kale
- ugu hanjabida qof in guriga laga saaraayo ama la gaynaayo xarunta kalkaalinta
- khiyaamida qof waajahaaya xasuus la; aan ama xanuunka xasuus beelka.

**Xadgudubka galmada** ayaa sidoo kale ah nooc kamid ah xadgudubka waayeelka. Xadgudubka galmada waxaa ku jira nooc kasta oo fal ama habdhaqan galmo ah oo aan qofku doonayn. Dadka waayeelka ahee jooga xarumaha kalkaalinta ayaan sharciyan ogolaan karin fal galmo oo uu la sameeyo shaqaalaha ka shaqeeya xarunta kalkaalinta.


**Xadgudubka dhaqaaluhu** waa mid kamid ah noocyada ugu badan ee xadgudubka waayeelka waxaana ku jiri kara falalka ama dabecadaha kaladuwan:

- in qofka waayeelka ah loo diido maamulida lacagtiisa
- khiyaamida qof wayn si uu kuu siiyo lacag
- iibinta alaabta qof wayn asaga oo aan kuu fasixin
- u diidista ama si khaldan u isticmaalida lacagta aad u maamusho qofka waayeelka ah
- ku qasbida qof badelida doonistiisa adoo adeegsanaaya hanjabaado iyo cagajuglayn
- samaynta dukumiinti been abuur ah oo qofka magaciisa loo adeegsado

**Dayacu** waa qaab badanaa dhaca oo kamid ah xadgudubka waayeelka waxaana ku jira falalka muuqda iyo kuwa dareenka. Marka daryeel bixiyaashu aysan buuxin baahiyaha jirka, caafimaadka iyo dareenka ee dadka waayeelka ah, waxay galayaan xadgudub ka dhan ah qofka waayeelka ah.

Maadaama dadka waayeelka ah ay ku tiirsan yihiin qoyskooda iyo daryeeleyaasha, mar kasta way ka cabsadaan soo sheegida xadgudubka loo gaysto.

1-855-626-0002  
<https://orientationontario.ca>



Funded by / Financé par



Immigration, Refugees and Citizenship Canada

Immigration, Réfugiés et Citoyenneté Canada

## RAADSASHADA CAAWIMAAD

Dhibaneyaasha xadgudubka waayeelka ayaa wici kara Laynka Badbaadada Waayeelka si loo caawiyo – 1-866-299-1011.

Haddii aad ka shakido xadgudub ka dhan ah qof wayeel ah, waxaad u sheegi kartaa booliiska. Booliiska ayaa baari doona oo caawiin doona dhibanaha. Hase yeeshee, sabab la xariirta in dhibaneyaasha xadgudubka waayeelku ay yihiin dadka qaangaar ah, way diidi karaan caawimaadaas.

Soo sheegida xadgudub ka dhan ah waayeelka MAAHA wax uu qasab ka dhigaayo sharcigu, ilaa in dhibanuhu ku nool yahay maahee xarunta kalkaalinta ama xarun kale oo caafimaad.

